

## Iskuxireyaal cusub ayaa oo ka falgalaya dambiyada nacaybka

Maayo 27, 2022

---

Laba iskuxireyaal bulshiyadeed cusub ee dembiyada nacaybka ayaa gacan ka geysan doona iskuxirka kooxaha ay saameeyeen dembiyada nacaybka iyo nidaamka caddaaladda si ay u caawiyaan ilaalinta dadka reer Alberta ee nugul.

Xukuumada Alberta waxay u magacawday Seseliya Misfondiwa (Cecilia Mzvondiwa) iyo Landon Turlock inay noqdaan iskuxireyaasha bulshada ee dambiyada nacaybka ee abid ugu horeeyay ee gobolka. Waxay si toos ah ula shaqayn doonaan bulshooyinka dhaqamada ee lala beegsado dembiyada nacaybka iyo eexda ku salaysan. Labada iskuxirayaal waxay kula talinayaan dawladda sidii loo samayn lahaa oo loo hirgelin lahaa istaraatiijiyad la isku dubariday oo dhammaystiran si looga hortago dembiyadaas iyo taageerada ugu wanaagsan ee dhibanayaasha.

"Alberta waxa ay qaadaysaa habab dhinacyo badan leh oo ay ku ilaalinayso kuwa ay beegsanayaan dembiyada nacaybka iyo eexda ku salaysan ee ka imanaya dembiilayaasha iyaga bartilmaansada. Aad ayaan ugu faraxsanahay inaan arko siyaabo badan oo isku xirka bulshadeena cusub ay naga caawiyaan inaan diirada saarno jawaabaha laamaha fulinta sharciga iyo taageerada dhibanayaasha dadka aadka u baahan. "

Tyler Shanro, Wasiirka Caddaaladda iyo Qareenka Guud

"Waan ku faraxsanahay inaan arko magacaabista iskuxireyaasha dembiyada nacaybka ee Alberta. Labada iskuxireyaal waxay noqon doonaan ilo muhiim ah oo lagu caawinayo dowladda si ay ula xiriirto bulshooyinka dhaqamada kala duwan si ay gacan uga geystaan wax ka qabashada dembiyada nacaybka iyo midabtakoorka."

Muhammad Yaseen, ku-xigeenka wasiirka socdaalka iyo dhaqamada kala duwan

"Dembiyada nacaybku waa xaqiiqo adag oo ka dhex jirta bulshooyinka Alberta. Si loola dagaallamo nacaybka loona abuurto bulshooyin nabdoon, waxaan u baahanahay inaan wada shaqeyno. Waxaan rajeynayaa in aan ka qayb-galiyo bulshooyinkeena iyo daneeyayaasha si aan u aburno jawi ammaan ah halkaas oo qof kasta oo reer Alberta ah uu yeelan karo dareen ammaan iyo lahaanshaha. "

Sisiiliya Misfondiwa (Cecilia Mzvondiwa), iskuxiraha bulshada ee dembiyada nacaybka

"Waan ka mahadcelinayaa fursadan cusub waxaana rajeynayaa inaan ka garab shaqeyso kuwa ay saameeyeen dambiyada nacaybka iyo dhacdooyinka gobolkeena. Waxaan rajeynayaa, in si wadajir ah, aan u aragno guulo laga gaaro dadaallada socda ee wax looga qabanayo arrimahan."

Landon Turlock, iskuxiraha bulshada ee dambiyada nacaybka

Iskuxireyaasha cusub waxay ku biirayaan liiska sii kordhaya ee talaabooyinka gobolka si loo xakameeyo dambiyada nacaybka ee Alberta oo ay si fiican u taageeraan kuwa la beegsaday..

Gobolku wuxuu soo bandhigay Barnaamijka Kaabayaasha Amniga ee Alberta si uu u bixiyo maalgelinta deeqaha ee ururada la beegsanayo si loo xoojiyo tillaabooyinka ilaalinta, sanadkanna maalgelinta ayaa labanlaabantay si loo caawiyo xitaa ururo badan.

Xukuumadda Alberta waxay kaloo abuurtay Unugga Iskudubbaridka Dembiyada Nacaybka si ay ula shaqeyso kooxaha sharci fulinta ee gobolka oo dhan si ay gacan uga geysato dhimista iyo ka jawaabista dhacdooyinka nacaybka horseedka u yahay. Unuggu oo wata shaqaale buuxa waa uu shaqaynayaa.

## Taariikh nololeedka

Sisiiliya Misfondiwa (Cecilia Mzvondiwa) waa aasaasaha iyo maamulaha Kala-duwanaanshaha, Sinaanta iyo La-tashiga, waana tababare hoggaamineed oo shahaado leh iyo kala-duwanaanshaha iyo fududeeyaha ka mid noqoshadawadajirka. Dhawaanahan, waxay qareen u noqotay Dobko & Wheaton, iyadoo siin jirtay taageero sharci iyo talo ku saabsan socdaalka iyo arrimaha qoyska.

Landon Turlock waxa uu u adeegay magaalada Edmonton sidii isku xirka badbaadada bulshada isku dubaridka iyo hogaaminta hawlgelinta dadweynaha si loo wargaliyo iskaashatooyinka ka hortagga dambiyada ku salaysan bulshada. Waa nin wax bartay oo khibrad u leh shaqada bulshada iyo ka qaybgalka bulshada.

Labada magacaabisba waa muddo laba sano ah oo dhaqangal ah Maayo 25, 2022.

## Xog la xiriirta

- Barnaamijka Kaabayaasha Amniga ee Alberta ([Alberta Security Infrastructure Program](#))

## Warar la xiriira

- Hor istaagista dembiyada nacaybka ([Taking a stand against hate crimes](#)) (Juun 10, 2021)

## Weydiimaha warbaahinta

[Joseph Dow](#)

780-983-8714  
Xoghayaha Warfaafinta, Cadaaladda iyo Garyaqaanka Guud

Classification: Public



# **ALBERTA'S RECOVERY PLAN**

Alberta's Recovery Plan is a plan to breathe new life into Alberta's economy and create new opportunities for every Albertan. It's a plan to build, to diversify, and to create jobs.